# 26 - LO' I

Fiqi Buraale: Maanta waa isniin, halka waxaa isugu yimid rag badan oo ay ka mid yihiin: Siciid, Cali Mudiir, Salad, Cabdi Dhegaweyne iyo Fiqi Buraale. Maantay waxaanu jecelnahay inaanu ka sheekaysanno Lo'da waxtarkooda; dhalashadooda; korrinadooda; sida loo dhaqaaleeyo, caanaheeda waxa ay taraan. *Meesiyaal* badan baynu soo marnay. Haddaba maanta aynu ku bilowno marka ay rimeeyso; inta ay ku rinto oo ay rimiqaad ku noqoto, inta bilood oo ay siddo; ilmaha ay dhasho ama weel ama dibi buu noqdaa; siday u soo koraan korrinadooda; inta ay lo'du ku *gur*to; saca inta uu *irmaan*aado; cimrigiisu intuu gaaro; dibiga iyo saca sida ay isku shukaansadaan ama ay isku *xodxodanayaan*. Bal arrimaha caynkaas ah baynu gelaynaa maanta. Waxaana ugu horreysiinayaa, oo ka hadlaaya lo'da waxaa uu ka xusuusan yahay, Dhegaweyne. Bal Cabdiyow, waxaad ka taqaanno lo'daas inoo bilow.

Cabdi Dhegaweyne: Lo' anigu wax badan baan gacanta ku hayay. Reerkayga lo'da joogta oo aabbahay iyo awoowgay ay iska dhaxleen ayaa anna aabbahay ka dhaxlay. Waxaan hadalkayga ugu horreysiinayaa sida ay lo'da u *rinto*, sida ay *dibiga* iyo *sacu* isu shakaansadaan iyo inta uu saca ku *rimiqaado*. Sicii iyo dibigii waxay isku shukaansadaan oo isku *orgeeyaan*, *orgeys* baa la yiraahdaa. Sacu, habeen iyo maalin, buu orgeeynayaa. Hadduu habeen iyo maalin dibi waayo sacu waxaa la yiraahdaa waa *guutoobay* oo beri dambuu orgeys soo celiyo mooyee maalintaa gobsayoo *orgeys-guur*. Waxaa la yiraahdaa sacu waa orgeysan yahay. Mar dibigaaba wadaabinaayo oo dibigaaba daba socda oo waxaa la yiraahdaa waa ku *dhididayaa*. Saca inta uusan orgoon, maalin ama laba markay ka dhiman tahay, yuu dibigu ogaadaa ee uu soo wadaabiyaa, dhowr habeen buu boodaa oo saddex habeen iyo saddex maalmood buu boodaa. Intaas waa daba socdaa oo ka hari maayo. Saca haddii uu orgeysan yahay, dibigu kama haro. Dibigu ilaa uu jidboodo ee uu saca boodo waa daba socdaa oo ka harimaayo. Marka qaarna waa ku soo boodaa orgoodkii oo intuu saca madaxa ka maro yuu cagaha dhulka la dhacaa oo waxaa la yiraahdaa waa batinayaa. Markuu ogaado inuu degay ee uusan ka dhaqaaqayn oo xasiloonaadoo oggolaaday yuu boodayaa; marka uu boodana waa iskaga harayaa. Markaa waxaa jira dibi yar yaroo kuray ah oo ayagu orgood-qabad ah oo ku markaa ka dib ku hoobanaya, sacuna kuwaas ma oggola oo waa ka cararaa. Markaas waxaan ugu heesi jirnay: "Korka kala hadal oo kan weynina hoosta kala hugun". Kii weynaa baa haysta, kii yaraana waa ku wareegayaa. Qaalmaha, qaalinta aad u kortaa saddex jir waa ku rintaa. Lo'da saddex jirna waa ku awr qaadaa, waxase u badan tahay inay u dhacdo afar jir dibiga iyo qaalintuba. Dibigu qaalinta waa ku rimiyaa saddex jir; qaalintuna waa ku rintaa, laakin afar inay u dhacdo yay u badan tahay. Waxay qaaddo ama siddo waa sagaal bilood iyo shan iyo toban habeen, waana sagaal bilood, lo'da qaarkeedse wax bey ku dartaa (sha iyo toban habeen). Lo'da iyo *fardaha* sagaalkaasaa caadi u ah. Sacna sida geeluu u rimaa waaba mar geeleeyaan bey leeyihiin, ama gu'guu dhalay gu'giisi buu rimayoo waa mar geeleeyoo sidii geeluu u rimay. Sacna waa ka degayaa oo

ama gu'giiba waa laga ceshaa, ama deyrtiiba deyrtuu rimay. Marka sida qaalibka taa gu'gii lagu celiyey *maqasha* waa u daran tahay. Neefkii gu'ga dhalay gu'gaas buu ku irmaan wanaagsan yahay oo xagaagiiba wuu gurayaa. Neefkii ilamaha ahaana waa cadcaddo oo weli waa yar yahay oo ma weyna. Marka neefkaasi suu u raaco waa adag tahay; dhaqaale kalana asagu heli maayo. Markaas waxaan ugu heesi jirnay: "Weesha uurkiyo, weesha oogada miduun ma engegay". Yacni labadu iskuma koraane mid uun baa khalaas ah ayaanu oran jirnay. Marka rimigeeda iyo intay ku awr qaaddo iyo orgoodkeeda intaa ayaan ka sheegay. Haddaan u gudbo lo'da dhalashadeed, horta waxa waliba dhicis bey leeyihiin. Aniga waxaanan ka soo marin lo'da ma jiraan oo waxaa jirtay weyl toddoba bilood iigu dhalatay, dabadeedna wey ii noolaatay. Weyluhu hadday siddeed ku dhashaan ma noolaadaan. Laakiin hadday weyshu toddoba ku dhalato waa kacaysaa, hadday dhaqaale hesho, dhogorna ma leh, waxaana jira cilmiyo lagu dhaqaaleeyo. Waxaad geynaysaa meel aad dambas ku shubtay oo aad ku haynaysaa ilaa dhogori uga soo baxayso. Marka sidaa weyl baa iigu dhalatay, dugsina waa ugaga dhigay, habeenkiina wax baan huwin jiray. Weyshaas toddoba bilood bey ku dhalatay. Ragga wax yaqaanka ihi dabeysha waa u daran tahay weylaha waa ka xiraan. Sacu hadduu maalintii daaqa kuugu dhalo, ilmuhu waa kuula soo carraabayaa asagoo ninka daba ordaaya. Ilmaha hadduu gelin hore dhasho, galabtii xeraduu kuula soo carraabaa. Marka, sacu xabka ka leefo ee uu ka soo baxo, xoogaa buu fadhiyayaa dabadeed wuu boodayaa, in yar markuu addimada dhulka la helane inuu jaquu doonayaa oo sacu waa jaqayaa oo waa dambarsanayaa. Marka aad soo qaaddo dibiga ama weysha hadduu kuu socon waayo oo uu dambar ka dhergo. Dibiga iyo weysha wayni kala jecleen. Dibigu hadduu yahay waa kugu kaadshayaa oo kaadida joojin maayo. Weyshuse kugu kaadin mayso oo dibiga waa ka hufan tahay oo iyadoo aan kugu kaadshin baad keenaysaa. Marka ninka dhaqaaleyn og markaasuu wuxuu dhisayaa *qaad*, xarkana waa u sii soohayaa, hadduu doono. Marka qaadkaa *qalwaa* la yiraahdaa oo weylahaa lagu ridaa oo lagu sii daayaa. Marka jiilaalka ay tahay, caws aad u soo gurto oo xerada intaad ku xirto oo uga laalaadiso maahee dibedda looma saaro, mar hadday jiilaal tahay. Cirku markuu da' oo daaqa ay cunaan yaa dibedda looga saaraa. Marka korrimadooda dugsiga ayey wax ku leeyihiin oo waa inaadan dibedda u saarin iyo dabaysha, illeyn doog ka cuni maayaane. "Ama bil kori ama laba iyo toban bilood kori". Haddii aad saca ku sii deyso oo ay baruureysato korriinadeeda kuguma soo noqoto oo dhayla qaad bey noqotaa. Hadday dhaylada ku xumaatana laba iyo toban bilood kama soo noqoto oo korriimay iyo caanay kaa rabtaa. Sidaasaa odayaashii hore ku yiraahdeen: “Ama bil kori ama laba iyo toban bilood kori”. Xuddun bey leeyihiin oo intay xuduntaasi ka go'ayso yaa caanaha loogu roonaadaa, ilaa ay ka kobcayso. Doogga markay tahay, intay ku ababayaan bil weeye. Bil markay joogaan cawskaas aad u dhito wey kaa cunayaan oo waa ababayaan, laakiin bishaas waa ay xirradaan. Weyluhu korriinadooda wa kala yihiin. Waxaa jira weyl aan qumaati u korin oo uu dooggu koriyo marka dambe oo ay ka gudhaba saca intay barwaaqo hesho bug markiiba tiraahda oo afar jirkaba ku orgoota. Kii heesay waa kii yiri: "Illaa min

baarqabow maalin bur u baxay oo barwaaqa ah yuu barqaday yuu baraarimay ".
Iyadoo baarrey barwaaqdii ku rintay, haddana jilaal baa u yimid iyadoo carruuroo dhalaysa.
Xooluhu diidey leeyihiin oo qaarbaa is-diida, oo sida la isku oggoleysiiyaan aqiin.

Fiqi Buraale

Xoolaha dhaqaalahooda aad buu u kala duwan yahay. Hadday noqoto lo'da, hadday noqoto geela, hadday noqoto ariga, hadday noqoto fardaha, hadday noqoto dameeraha, mid waliba qaab loo dhaqo oo u gooni ah ayuu leeyahay. Xoolaha iyagoo sidaas ah ayaa manaafacaadkooduna kala duwan yahay. Lo'da waa weyraxdaa, weyna insaarixisaa, waana la maweeyaa. Markay soo caano yarayso ama ay wax diiddo geedka *mawaha* oo u eg barida yaa, inta la qoro, sabiisha laga geliyaa, markaasey godlataa oo godol badan keentaa. Iyadoo markii weylaha laga xiro qaarka ay ku jiraanoo ay soo daawato. Markii ay casirkii reerka ku soo noqotana wey soo insarixinaysaa oo insaarix baa la yiraahdaa. Lo'du mar wey weyraxdaa oo ay ugu wacnaan ama ha aragto wax aysan arki jirin oo ku weyraxdo ama ilmahaba ha ku weyraxdo ama bahalba ha soo dhex galo oo bahalkaas ha ku weyraxdo.
Waxaan iminkana warka u gudbin doonaa jaalle Salaad, wixii ka dhiman ee uu ku sii dari lahaa.

Salaad

Mahadsanid Buraale. Waa taad hore u sheegtaye xooluhu waxaan u maleenayaa degaanka waxyaalo yaryar ee dadka ay ku kala duwan yihiin oo waxba saas u sii badan inay jiraan. Marka u horreysa xoolaha anigaani idin la hadlaaya aan dhaqay waxaa u badnayd lo'da, al-aankan meeshii anigu aan ka imi bey sidii u joogtaa. Lo'da, annaga waxaan niraahdaa, qaalin hadday darab weyn tahay, darab weyn waxaa la yiraahdaa qaalinta da' dashay ama laba dhashay. Toban bey qaadddaa baan ugu xisaabtannaa. Marka ugu horreysa, dhaliddeeda, laba kalana oo curaddaana bey qaadaye toban bilood bey ku dhashaa carrigeena Mudug.
Marka xoolaha, lo'da iyo riyuhu waa isla mid. Lo'du hadday orgeysan tahay sacu ma daaqo, waa cararaa, waa ciya, waa ordahayaa ilaa uu dibi ka helo. Riyuhu waa sidoo kale iyaguna waa cararaan, laakiin iduhu lama mid ah. Marka dibiga waa laba: mid waxaa la yiraahdaa *waali* oo waa dibi yaroo xuur ahoo, markaas kacaya oo lo'da u hor leh. Dibina waa dibiga lo'da abaahiya (booda) oo *jamal* la yiraahdo. Dibigaan dambe annaga *jamal* baan magaciisa u naqaa. Markaa dibigaa *jamal*ka ah saca wax badan buu wadaalinayaa oo la soconayaa, suu u cararaayo waa xodxodanayaa, suu u wadaalinaaya marka dambe waa boodaa. Hadduu boodo, dibigu waa *gus* xoog badan yahay oo sacaas dhiig buu sii daayaa. Marka la boodo sacu waa qanaaniyaa, sidii asagoo dhalihaayo ayuu qanaaniyaa. Mar haddu saca dibi waayana oo laba habeen ama saddex habeen dibi waayo waa *guuntoobay* baa la yiraahdaa. Sacaas guuntoobay waa inuu orgood dame soo celiyaa.
*Weyli*hii baa marka inoo soo haray. Weylihii marka ay yar yihiin magacooda waxaanu niraah *dheg-cas*. Weyluhu markay xoogaa

koraan *aala*na aysan gaarin, war weyluhu *ka-goys* ma gaareen mase maya ayaa la yiraahdaa. Waxaa kaloo jira, laba nooc ayaa xoolaha socon kara markay dhashaan oo ilaa habeenkaas meesha neefku ku hoydo gaari kara. Annaga lo'da markay dhalato, ilmaha ay dhashaan, haddii xabka ay mar ka qallalaan, ilmaha lo'du waxay socon karaan, meeshaas caaway gaarto oo habartay la soconayaan waa ka dheeraynayaan oo ilmaha intii ay doonaan bey soconayaan. Ilmaha iduhu waa sidoo kale. Ilmaha geela iyo ilmaha riyaha midna ma dheereeyo. Xooluhu waa afar *meesi*. Lo'da intay doontey soconaysaa, iduhu intey doonaan bey socdaan markay dhashaan. Laakiin ma dhaqaaqaan riyaha iyo geela oo waa inay ayaan joogaan. Horta, qorraxda waa u daran tahay lo'da. Dhulka bannaanka ah oo aan cawska maahee wax kale ka bixin, beled hebel baa la yiraahdaa, lo'du markay ay meesha bannaanka ah oo aan geedka lahayn soo istaagto waxa uga daran ma leh. Marka lo'da waa sida geela oo ceelka dhanaan wax uga daran ma leh oo ceelka dhanaan biyihiisa lama siiyo, carrada Nugaal lama siiyo, carrada biirta leh waxba uma dhimo hadday biyihiisa macaan yihiin waxba ma dhibo. Ceelka dhanada ah oo geela laga waraabiyo laba kal hadday u soo aroorto waa bes waa dhammaatay. Qaalinta *daan-dheerta* sacba kama haro, mid irmaan iyo midka duqa ah.
Haddaana anigu sida geela ka daran baan ugu owr-galaa. Lo'da laba dibi midna looma daayo oo waa laga ilaaliyaa: Dibiga madow looma daayo; dibiga guduudan oo *gambeel*ka ah oo indhaha gurucsan isna looma daayo oo waa laga ilaaliyaa. Marka lo'da waxaa loo jecel yahay oo awr looga dhigaa dibiga cad. Waxaase jira dibi cad oo aan loo bogin oo indhaha ka shuuqa oo kaasna lo'da looma daayo. Dibiga hadduu madow yahay midka darmadda leh waa loo daayaa, oo waxaa la yiraahdaa qaarka sarane waa ka madoobaadaa, qaarka dambe iyo bawdyahana waa ka madoobaadaa, *darmad-ceeriin* baa la yiraahdaa oo dibigaa waa loo daayaa. Midka kale oo dhoobka lehna waa loo daayaa.
Horta, lo'da cuntadeedu waa caws. Lo'da, haddii nee kastaa baxo oo wax kastaa baxaan, haddeysan caws haysanin, annaga caws kale oo lo'da Nugaasha aan ku arkayoo ay daaqaan waa laga ilaaliyaa cawskaan la yiraahdo dareemada oo fardaha iyo geela ay jecel yihiin waa laga ilaaliyaa: Lo'da annaga cawska la yiraahdo *webis*ka, iyo cawska la yiraahdo *qaalma.qooqshe* ee dhulk *cadduumada* ah waa laga ilaaliyaa. Lo'da midabbadeedu waa wax badan oo anigu ma koobi karo.

Fiqi Buraale

"Haddaaan la rogrogin rag baan helin" baa la yiri. Bal halkaana waxaa gacanta taagaaya Cali Mudiir oo ama ha ku soo dhaqmo oo isagoo yar ha lagu soo koriyo ama usaga ruuxiisuba ka dhaqdee, waxay ila tahay inuu isaguna aqoon u leeyahay. Sidaas Salaad u sheegayna soomaalidu inkastoo ay xoolaha wada dhaqaalayso, qola waliba si bay misna u dhaqaalaysaa oo ama degaankaa kala duwan oo degaanku mar hadduu kala duwan yahay, dhirta ka baxdaana wey kala duwan tahay. Inkastoo magacyada qaarkood qolaba si u taqaanno misna degadka markay tahay iyo *babaca* iyo *bannaan*ka iyo dhulka kale ee carrasanka ah dhirta waa ku kala duwan yihiin. Biyahana waa ku kala

duwan yihiin oo sidaas ay u kala duwan yihiin ayey carraduna u kala duwan tahay yaa biyuhuna qaarna macaan yihiin had iyo goor, qaarna ay dhanaan yihiin, qaarna ay yihiin kuwa iska culus.
Had iyo goor, sidaa uu sheegay Salaad, lo'da waxaa u wanaagsan biyahay *calcalyada* ah ee aan ahayn kuwa dhanaanka ah, dooxo iyo bannaan iyo meel caws leh iyo dhir iyo baad leh isugu jirta waa u wanaagsan tahay lo'da. Meel dhagax lehna waa u liidataa oo ma jecla lo'du, dadkuna uma jecla. Iyadoo sidaas ay tahay, bal Cali Mudiir intuu inooku sii dari lahaa aan asagana u gudbiyo.

Cali Mudiir: Anigu waxaan rabay odayaasha inaan godliyo oo wax weydiiyo, waa la igaga fiican yahay dhankaan. Waxaan rabay erayadatan bal in la noo sii fasiro. Markuu sacu orgoodo ama xataa xayawaanka kaleeto ayadoo *irmaan*, imisay irmaanka sii hayn karaan intaysan dhalinin?. Tan kale, waxaa loo baahan yahay heeska lo'da, marka la shubaayo ama marka la daajinaayo ama mar kastaba ama lagu amano ama koolkoolinta; bal in odayaashu noo sheegaan erayadatan *gayax* iyo *ereg* maxay kala yihiin. Sac *ereg* ah; *sidig*; *madi*; *dooray*; *araasi*; *godol*; *xigid*. Waxaa kaloo jira, midabyadii oo lagama maarmaan ah in la sheego: midabka *dhiin*ka; *xay*ga iyo waxyaabahaas in la sheego. Marka erayadaas ayaan doonayaa in aan u sii tilmaamo odayaasha say u sii xusuustaan. Waa ka baxay. Waa mahadsan tihiin.

Fiqi Buraale: Horta erayadaas iyaga weynu naqaanaa oo waa su'aal taaqan. Su'aaluhu midu waxaa weeye intuu irmaanaan karo, midina waa *xigid*. Anigu *ereg* ma aqaan, laakiin iga baan aqaanaa. Hase yeeshee intaanan wax ka fasirin waxaan u gudbinayaa Cabdi Dhegaweyne. Inkastoo midababadu inoo dambeyn doonaan, laakiin erayada muhiimka ah inuu nooga hadlo sida *xigta*, *xooxda*, *godolka*, saca dhaliddiisa iyo inta uu *dhaqaya-maal* uu noqon karo, bal Cabdi aan u gudbiyo.

Cabdi Dhegaweyne: Horta erayadaas, iminka Cali Mudiir sheegay, mid baan ka aqaan, idinkuna ka taqaaniin. *ereg* aniga waxaan u aqaan saca amaanada ah. *igar* waxaa la yiraahdaa xoolaha neefkaan ilmaha lahayn oo geel, ari iyo lo' waa ka siman yihiin.
*Gayax* geelaan niraahdaa oo waa hasha *xilkas*ka ah "war gayaxii afartaba ka miis", laakiin lo'da kuma maqal. *Kidibtu* geel iyo lo'ba waa leedahay, waa neefka meydkiisa inta hilibka laga qalay lagu sidkaa, dahuu bakhti ku soo dhashaana neefka kale loo soo qabtaa lagu sidkaa, hadduu maliil ku dhashana intii dibigii neefkii laga gowraco oo neef kale xabka loo marmariyaa, ama asagoo aan arkayn ama indhaha laga qabtay, ama jiifaba oo neefkii aad soo xirxirtay yaa daba dhigeysaa oo aad inaad ku sidigtid damacday, oo kii aad u sidki lahayd waa lag qarinayaa oo halka dambuu kuugu xirxiran yahay oo afarta addin baad isku iraysaa. Kiisii markaad soo bixiso yaa soo jiidanaysaayoo kiisii baad xabkii iyo wuxuu qoyaan lahaa marmarinaysaa. Markaad goyso yaad kii ka siibaysaa oo waad qarinaysaa, kii aad ku sidkaysana waad hor dhigeysaa, neef neef diidana la arag, laakiin qaalibkooda saasaa loo sidkaa xoolaha oo ay ku qaataan geela iyo lo'daba sidigta. Marka neefkii lab sac buu isku yahay oo kala ah kii markii hore dhalay iyo kan damboo lagu sidkay.

Xoox wuxuu yahay sac aan godolba lahayn, afarta caano ka buuxiyoo xooxda laga lisaa baa xoox la yiraahdaa. *Dhaqayadana* waa sac caano badan. *dooray* baan isna Jubbooyinka ku bartay oo waa saca *baajin*ka ah ee aan caanaha lahayn. *araasi* waa saca casarkii soo xaroda, soo insaarixiya oo meeshuu ubadka ku ogaa u soo insaarixnaaya oo ku soo ordaaya. Sacaas waa soo insaarixiyey baan niraahnaa.

*Gayax* aniga geelaan u aqiinay haddaanan been sheegin. Horta, lo'da inatay irmaanaatana waa i weydiisay, marka la boodo oo ay rinto. Dad iyo *duunyo* wax isku dabeecad ah ma jiraan. Lo'duna isku dabeecad maaha, geela isku dabeecad maaha. Sac intuusan in yarba joogin waa ku dhifanayaa oo waa gurayaa; sacna sida loo maalaayo yuu ku dhalayaa oo guri maayo; sacna markuu dhowr bilood irmaanaado oo inta ay qaaday shan bilood ilaa lix bilood meelahaa jooga oo la daaweeyo yuu ku dhifanayaayoo gurayaa. Midba waa sida Alle u buurayoo waa kala hidda fiican yihiin. *sidig*ta waa siduu Salaad sheegay qaarbaa diida. Waxaaba u badanoo ay ku diiddaa, matalan neefkii baa iminka dhashay, say isagoo aan weli mandheeran oo aysan mandheeru ka soo bixin yaad lo'dii ku aroorisay oo ka eriday. Sida qaalibka ah, habeenkii markuu yimaado waa diidayaa, sacuun hidda fiican maahee. Mar haddii asagoo aan mandheeran aad neefkii aad ka dul erido, sida qaalibka ah waa diidaa. Neefka waa inuu ku dul madheertaa oo markii mandheertii ka timaado uu engegsado neefku u kaco aad ka eridaa. Marka uu diido waa la tolayaa. Lo'da *ugub* haddey tahayna waa inaad xabka dhansiisaa marka hore illaa sacaan horuu xabka u yiqiinaye waa leefayaa oo qaalmaha qaarbaa iska siiboo xabka haddaan la siin oo la xabsiin, intay iska siibaan neefkaba ka baxsada oo aan ilma-diid kale ahayn. Xabka markaad dhansiiso, markaad ilmahii ka soo bixiso sidii buu ku oggolaanayaa waa leefsanayaa oo xabkana u macaan xoolaha dhalaaya. *ugub* haddey tahay waa inaad xab siisaa lo'da. Qaar caana ayuu kuu diidayaa oo ubadkiisa waa oggol yahay; qaarna waa kaa rarayaa waadba qabanba karayn. Qaar markaad weeyl ama weesha ku sii deyso wuu diidayaa uba soo dhowaan maysid inuu ubadkii u godlado mooyee. Qaar waa cararyaa intuu godlado yuu ku haraatiyayaa oo boodboodayaa oo in la qabto oo caano laga maalo yuu diidayaa. Marka waxaa jira qaar aan la qaban karin oo carayaa. Kan markuu godlado carayaa waa laga daaweystaa oo ama xarig baa geesaha looga lulaa. Weerkaasna lo'da wa loo xiraa oo waa lagu maalaa. Kaa weerka leh waa saca ragga barbaarta ah mooyee aayan naagaha, carruurta iyo waayeelka maali karin. Marka raggu kaa waa jecel yihiinoo oo raggu saca madiga ah ee saa ah intay qabsadaan bey *haruub* ka buuxsadaan oo ragguu u roon yahay reerkase waa u daran yahay. Waxaa jira sacaan lo'daba u soo gelaynoo dhiilleysanoo halkaa iska taagayo lo'da is-oggol. Marka ninka lo' yaqaanka ihi qaar badan oo sidaa u baxay buu ka gooyaa. Anigan, qaalin ii curatay, waa garanayaa, halkaa iska taagtayo, weeysheedii oggol, aniganа mar allaale markay i aragto dib u cararaysa oo markaan ku soo dhaqaaqo boodaysa, oo garabweyntii Salaad sheegay oo kale ah, oo lix jir ku curatay. Marka weysheeda lagu soo daayana oggol oo weysheeda jecel, markaan ku soo dhaqaaqana iska boodeysa. Dawlalkan ceelasha kaga cabaynay yaan subixii iyadoo xerada ku jirta, lugtaa kaga xiray, dhalaandhisha dambe (*dhaas*ka) waaba jiidanaysaa.

Hadhow baan u keenayoo, say labadii subax oo hore ii gashay. Markaan u soo daayay yay boodday, saan xariggii baan ku dhegay, iimana dhowee halkaasay joogtaa. Laba subax markaan saas u galay, iyadoo taagan oo aan dhaqaaqin baan subaxdii dambe u imid.
Waxaa jirta mid aan neefkaba ogolaan, mid *igir*ta iyo neefkaba diiddoo muquuno ah oo la yiraahdo kaasu waa iska hilib *igir*ta iyo neefkaba diidda, caanaba lagama helo ama ha la qasho ama ha la gato si kastaba ha loo galee. Waxaa jira mid neefka diida oo igirta oggol oo la malo. Kaas diiday neefka oo laga quustay, sida geela, waa la tolaa. Geesha xarig lagaga duubayaa, geed baa laga soo lulayaa, dhexdaa labada jeeni dabadeeda ah waa la xirayaa. Marka waad booraysaa wax boor ah ayaad meehaas ka buuxinaysaa, biyahaas waad u diidaysaa, waa ka xiraysaayoo labada addin ee dambana waa laga dabrayaa, weyshii baad ku sii daynaysaa. Marka waad booraysaa oo dhir badan oo lagu booraa jirta. Waxaa jira geed haddaad ku boorto amar Ilaah mooyee ayan diideynba oo xanuunkaasuu kaga keenayaa geedka *tiira*ha la yiraahdo. Xarig yar ayaa labada madax kaga xiraysaa oo tiirahaasaad gelinaysaa. Sida qaalibka ah sac ibtila qab ah oo dhib badan mooyee diidiba mayso *igar* iyo *sidig*ba. Geedkaa weeye geedka lo'da ka adag, wamahana mar waa noogu godlan jirtay, marna waa nagaga dudi jirtay. Midbaa makaad qabato ha kaa cararee aad iska maashaa. Midba cayn baa lagu maalaayoo, irmaankeeduna waa saan idiin sheegoo aan iri sacba waa waa dabeecaddiisa, qaar dhexduu kaga guraa, qaarna mar bil ama dhowr iyo toban casho joogaba waa ku dhuftaa marka dibigu boodo waa iska diidaa.

Fiqi Buraale — Waxay ila tahay si fiican baad uga jawaabtay su'aalihii, inkasta oo kuwa badan ay dhiman yihiin. Midabkiina waa noo dambeeyaa. *xoox*dii iyo *qoxasha*dii iyo insaarixintii iyo wax badan ka jawaabtay.
Haddana waxaan hadalka u gudbinayaa Salaad.

Salaad — Mahadsanid, Fiqi Buraale. Horta Cali su'aaluhuu na su'aalay *igar* waa neefka, sida Dhegaweyne sheegay oo waa ku raacsanahay. *gayax* iyo *igar* waa isku hal oo gayax reer-koonfurkaa yiraahda *igar*na ree-waqooyiga. Xoox waxaa la yiraahdaa neefka aan godlanin lana maalo oo naasuhu caanuhu ku soo dhacaan. Lo'da *dhaqayo-maal* waxaa la yiraahdaa saca dheeraada oo yacni wax badan aan organin, saddex sano intii ah la wado. Neefka ciyooba orgooda oo lo'da ah, meesha geela la yiraahdo *haleela-rin*, asagana waxaa la yiraahnaa *dhaada-saar*. Marka lo'da igarkeedu, annaga xaggeena, lama tolo. Geela igartiisu waa laba, laakiin lo'da igarkeedu waa hal. Geela sidigtiisa mid xabkaa loo mariyaa, neefkuna saasuu ku oggolaadaa. Midna waa lagu tolaayoo sakaa laga tolaa oo waa la dallacaa oo xaarkaa lagu celiyaa oo hasha saasay ku oggolaataa. Lo'da annaga xabka loo mariyo maahana mid la tolo ma naqaanno.
Horta, *toog* iyo *faraw* waa isku hal oo waa Xamar iyo Muqdisho. Faraw iyo tood waa neefka aan la qaban karin oo waa isku mid, annaga xageenna. Waxaa jira *doorow*, doora tus baan niraahnaa. Weeshii marka lagu daayo, intaa dad u muuqdo la joogsan maayo, wuxuu la tegayaa xaggaas markaasuu ilmihii ugu godlanayaa ama dibi ha ahaato ama weel ha ahaadeene. Intaas xataa lo'da ka ag muuqato u

godlan maayo oo halkaasuu la istaagayaa. *tukanuug* idinkaa reer-koonfur ahaaye annagu *hayaaya* ayaa niraahnaa, waa neefka wax waliba iska maalaanoo igarka ahoo, qof waliba iska maali karto, miduu yaqaanno iyo mid uusan aqoon. *dambaxir*ka lo'da dhowr melood baa laga xiraa. Sac waxaa jira aan la qaban karinoo *geesa-saar* baa la yiraahdaa oo geesahaa laga xiraa. Saca *dambaxir*ka la yiraaho labada *caana-madaatayaal* yaa laga dabraa oo waa u badan tahay oo waa qaalib, midna labadaas *feylood* baa laga xirayoo dambaxir kaasaa reer-koonfurtu yaqaan, annaguna faylahaa laga dabray ayaanu niraahnaa. Kar waxaan niraahnaa annagu *dangaal*, waa duurkaasoo la gooyoo saca jeer caano loogu shubo ee uu carrabsado mooyee waa diidaa. *cusub*na waxaa la yiraahdaa, neefkiiyo kala dhigayaayoo waxaa laga buuxinayaa caws iyo jillab meeshaasaa loo soo qotominayaa oo addimaa loo sameynayaa halkaasuu taagan yahay oo *cusub* baan niraahnaa.

Cabdi Dhegaweyne: Malas waxaan sheegayaa ama caws baa loo dhigaa ama *buunsho* baa loo dhigayaa ama maseggaa la hor dhigayaa oo lagu maalayaa. Malastaasuu ku godlanayaa, haddaan waxaa loo dhigin godlan maayo oo waa diidayaa.

Fiqi Buraale: Horta inta aad sheegtay oo dhami waa inuu kaa raacsan yahay. Waxaase jira eray ama saddex eray oo aan weli si fiican u iftiimin. Waxaa tiraahdeen *haleela-rin* waxaaa niraahnaa waa *gabnugul* yahay, waa *gab-jilicsan* yahay, waa *qab-adag* yahay. *awr-la-bood* neefkaas markuu dibigaasu saarto markiiba rima, midna ilaa lagu noqnoqdo oo dibigaasu ku noqnoqdo ma uu rimo. Markaasaa waxaa la yiraahdaa waa qab-nugul yahay, kaas markii uu fuulaba rima. Waa qab-adag yahay baa la yiraahdaa, haddii dibigu awrka ku noqnoqdo. Marka la eego *ugub*ka iyo *curad*da waa laba nooc: waxa dhiiggu ka yimaadaa had iyo goor waa ugubka oo qaalinta curadda ah dibigu markuu boodo dhiigga kama yimaado.

Tan kale ee aad tiraahdeen ama *xoox*da ama *godol*ka, nooc kastaba ha ahaadeene waxaa weeye sidaad u tiraahdeen.Maahmaah baa jira iyadana la yiraahdo oo geela loogu maahmaaho: "Hasha markay diidayso maqaarka daldaloollo bey ka daydaa". *gandaal* oo gandaalkaasu waxaa weeye, inta wejiga ah yaa looga sameeyaa, markaasaa afar gees xir leh looga xiraa.

Xooluhu waa midabbo badan yihiin. Xoolaha midibka waa lagu kala jecel yahay, oo muuqaalkooda, hilibkooda iyo weynaantooda waa lagu kala jecel yahay. Lo'da marka loo heesaayo waxaa la yiraahdaa: "Dhiinow, dhiin dhale, dhiin garaar dhale, weysha dhiinka leh ee dhabada taal dhiin yar baa dhalay, dhiin yarow dhimo oo dhurwaa ku cun", waa tan loogu heeso lo'da. Halkaasna waxaa laga la socdaa midibkii.

Waa ogsoonnahoo lo'du waxaa weeye nugul oo lo'du biyaha bey jeceshahay, kana adkaysi yar xoolaha kale oo had iyo goor laba-qad bay noqotaa ama saddex-qad ama afar-qad noqotaa iyadoo ay dhibaato ku tahayoo waa tii Sayid Maxamed Cabdille Xasan lahaa: "Jiilaal baraahsaday sicii balatay weeshiiye buqbuqoodka iyo ciirtu waa beri samaadkiiye [...] yaw sheega”. Mar haddeysan lo'du *dooxo*

wanaagsan iyo biyo wanaagsan iyo xareed iyo cawskii carrabka saa ugu soo qaadayso ayan haysanin, lo'daasu waa baabba', meel kastaba ha joogtee; waxaana ugu wacan, sida *baalalley*da iyo *roob-la-dhaca* ay roobkana ku soo dhacdo oo markiiba baabba'do. Lo'du waa saasoo kale, markaad *meesiyaa*sha u eegto, saasey uga liidataa xoolaha kale oo waa *nugul* baaba la yiri oo waa biyo ku nool. Midda kale lo'du markay barwaaqo joogto wax ka nafac badan ma jiraan oo ama caano ha noqoto ama subag ha noqoto. Lo'du mar barwaaqadaas kuu joogto kuuna irmaan tahay, reerkaasi waa ka duwan yahay dadka, oo dadka ka falaxfalaxsan oo ka qurux badanoo ka timo wanaagsan. Reerkaasu waa reer qoyaan ama ciir ha loo dhammo ama *ka-soofeyn* ha loo dhamo ama *dhaay* ha loo dhamo oo lo'da caanaheeda waa saas. Ciirta lo'duna ka ciiraha kale (ariga) oo dhanaan ma laha oo wax ka macaan oo wax ka qabow, oo wax ka raaxo wanaagsan. Marka waxaa la yiraahdaa waxay leedahay *saan*, *subag* iyo *caano*. Hilibkeeda gaajada uun baa na bartaye soomaalidu ma jecla oo waxay tiraahdaa: beerkeeduna wuxuu leeyahay kuraankurro, baruurteedana waxay isku baruuur yihiin libaaxa. Libaaxa iyo lo'du waa isku baruur, oo markaad dibiga weyn oo *baqay*ga ah qasho oo xayrta ka saliiddo, markay neecawdu marto, isla markiiba waa guduutaa, hilibkeedana saasuu u guduudan yahay. Marka dadka badiba waxay sameeyaan gabadha bey siiyaa oo qolana waxay tiraahdaa *dhibaad*, qolana *diir*, qolana waxay tiraah *gufo*. Magacyo badan baa loo isticmaalaa labada reerood ee xididka ah sey gabdha wax siiyaan ama soddohda ha keento ama gabadha ha soo dhibaad doonato, ha soo doonato gufo.

Dibiga marka la qalo oo hilibka *dulaandulla*da ah ee filleti gaaladu tiraahdo oo ay jecel yihiinoo *bisteeki*ga laga dhigo ama *kutileeti*ga laga dhigo iyo *bawda*daas muruqa ah ayaa midba bar loo gooyaa ee malaha hilib kale *muqmad* looga jaro, oo waxaa iyadaa loo yar raacaa wey hilib jilicsan tahay. Dulaadulladu marka muqmadda laga dhigo oo *oodka*ca laga dhigo wey ka hilib jilicsan tahay, geeluse wuxuu noqdaa seed adag. Gaaladu waxay jecel yihiin hilibka lo'da. Cunidda hilibka lo'da, soomaalida, waxaa u badan koonfurta, laakiin dadka reer waqooyiga ah ama Bari ha ahaadeen ama Waqooyi-Galbeed ha ahaadeen ama waqooyi-dhexe ha ahaadeen ma jecla iyagu hilibkeeda, laakiin konfuri iyadu aad bey u jecel yihiin hilibka lo'da oo waa isticmaashaa. Badiba markaad xagga kan u soo gudubto Afgooye wixii ka shisheeya oo raacsan Jubbada Hoose iyo Jubbada Dhexe iyagu lo'day jecel yihiin, meeshaan annagu geela iyo ariga hilibkooda ka jecel nahay; laakiin waa la iska cunaa. Lo'da markay shilis tahayna waa wada baruur, waxaana la yiraahdaa cudurraa laga qaadaa oo waqooyi ma ay jecla lo'da hilibkeeda.

Haddana waxaynu u gelaynaa midibada lo'da. Sidaad ogsoon tihiin, lo'du waa midabbo badan tahay . Weliba lo'da midabbada badan waa laba geesood. Wixii Xamar ka bilowdoo xaggaa iyo Bari ka xiga midabbada lo'du waa yar yihiin. Laakiin markaad xagga kan koonfur uga kacdo lo'da midabbadeedu aad bay u badan yihiin. Lo'da aynu dhaqanaa ama Mudug ku dhaqantaa ama Nugaal ama Bari ku dhaqantaa wey ka waaweyn tahay lo'da tan; waxaana ugu wacan biyaheeda badan oo biyahay aad u joogtaa, tasna oonkedaa badan oo saddex-qad ama afar-qad bey noqotaa. Marka dabeecaddaasaa kala

weyniisay. Maxaa yeelay, lo'da iminka Xamar ku dhaqan iyo Kismaayo,waana ku hayn jirnay waana ka soofi jirtay. Lo'daas waxay soo daaqi jirtay dhulkaa daaraha laga dhisay oo dhan. Markay soo hoyataa saddex goor la lisi jiray oo fiidkii waa la lisi jiray, lixdii saac waa la lisi jiray, duhukiina waa la lisi jiray, barqadiina waa la lisi jiray.
Waagii hore, caanaha lo'da lama biyeyn jirin, laakiin hadda maadaa ay yaraatay oo xilligii uu jiri oo arrimo badan isbeddeleen, hadda biyo waa lagu daraa caanaha lo'da.
Bal haddana waxaan u gudbinayaa Jaalle Saciid.

Saciid — Waa mahadsan tahay Ibraahim. Waxaa weeye, odayaasha, lo'da qiyaastii si fiican bey uga warrameen, dhinac loo eegana wey ka sheekeeyeen. Aniga waxaan ku darayaa: lo'da waxaa weeye meesiyaasha ama xoolaha aynu dhaqanno waa ugu nugushahay oo waa *nugul*. Marka lo'da iyo haweenka iyo idaha, qabowga, neefka qabow ayey isku dhaqan yihiin. Dhulka kuleylka ah aad iyo aad bey ugu dhibaato badan yihiin. Inkastoo dhulkeennu uu iska kulul yahay oo ay isaga dhaqanto, haddana wanaageedu waa qabowga. Lo'du waa biyo-ku-nool oo haddeysan candhada biyo ugu jirin maba noolaan karto. Waa dhici kartaa haddeer dhulkeennu inuu oomane u badan yahayoo mid oomaanaha iska joogto oo ariga la daaqdaa inay jirto. Dhuusamareeb anoo u sii socda ayaa roob yari ku da'ay jidka iyo laamiga u dhow- dhow laamiga, waad aragteenoo biyo yar buu saydhaa, intaa geesihiisa ah buu sayraa oo intaa geesihiisa ah baa dhaqsaba waxay soo bixisaa geedo yaryar oo ramad iyo waxyaaba yar oo dhirta ku dhow dhow baa caleen bixisa. Waxaan arkay lo'da oo sidii arigii qurac feensanaysa oo afka kula jirta. Lo'duna sharafteeda maaha oo wanaaggeeda waxa weeye meel deggan iyo caws ama doog ha u ahaado ama ha u engegnaadee, meeley afka ka buuxiso, biyana ay ku haysato. Lo'du adkaysina ma leh oo waa taynu horay u sheegnoo meeli markay abaar noqoto ama oomane waa ka nugushahay xoolihii kaleeto oo aad iyo aad bey u dhibaato badan tahay.
Marka loo dhaqaaqo caanaheeda waa sideynu uga soo sheekaynay iyo qalliinkeedii oo caanuhu neef waliba waa si oo waa abuurta Ilaahay. Haweenka waxaad arkaysaa kuwa ilmaheedii caano looga qaadayo, oo la leeyahay naaskeedaan caana lahayn. Lo'da waa la mid, geelii waa la mid. Lo'du ayada waa iska reer-gaaloo magaalooyinka ayey isaga dhaqan tahay oo sida geela beldaanta kama fogaato.

Fiqi Buraale — Waa mahadsan tahay Saciid. Sida aad u sheegtay, lo'du waa xoolaha nugulka aynu niraahno.
Iminkana waxaan u gudbinayaa Cali Mudiir.

Cali Mudiir — Waxaan rabaa inaan Xaajiga godliyo. Xaaji, waxaa jira in, gobollada qaar, Soomaaliya, dibigu waa gaadiid lagu guuro, la rarto oo ratiga ka wanaagsan. Waxay yiraahdaan *baqay*. Marka waxaan rabaa inaad sii waddo baqaygaas iyo *dhufaan*ka iyo *tumay*, lo'da guduudan, lo'da cad, alaabadaas oo dhan oo aad faahfaahiso, taas ayaan doonaayey inaan ku xusuusiyo.

Fiqi Buraale — Horta Cali, sidaad u sheegtay, waa laba nooc oo kala duwan oo waana

midabka ayey ka hadlaayaan, sidaad u hadashay, waxna waxay u hadlaayaan oo su'aashaada ku saabsan, xagga dibida ama *qoor* ha ahaadeen ama *dhufaan* ha ahaadeene. Marka inta aanan gelin midabada *guduud*ka, *xay*ga iyo *beydi*, oo aan aniga rag iiga sii aqoon badan u gudbin doono, waxaan kuu kala macnaynayaa: *baqay*, *dhufaan* iyo *tumay*. Horta marka tumay la yiraahdo waa magac-guud oo wax kastaba ha ahaatee waa neef xiniinyihii la tumay. Dhufaanna waa magac-guud oo waa neef uun xiniinyihii laga baxshay. *baqay* markii la yiraahdo, markuu intaas ka soo baxo yuu wuxuu noqdaa *koron* oo *awr* koron ah baa la yiraah. *Baqay* haddaad maqasho waa dibi saas loo tumay ama loo soo dhufaanay oo markaas weynaaday oo ama ha la raro ama yaan la rarin. Inkastoo dadku aanu wada rarin waa kaa lo'da kuugu jira oo aad u shilis oo aad u naaxay oo waa baqayga. Halkaasna waxaa laga tilmaamayaa tigaadda ku jirta, caddiinta ku jirta oo weynaantiisa ayaa loo yiraahdaa *baqay*. Baqayga rarriinkiisa, soomaalidu ma wada rarato oo rijima qaarbaa laga rartaa. Gobollada laga rartana waxaa u badan Jubbada Hoose. Xataa aniga waa rartay dibi. Horta, intuu awr kuu qaado kuuma qaado dibigu oo heeryada awrka la saaro oo faraha badan lama saaro oo mid asaga ku filan baa la saaraa. Dibiga waa lagu safraa, laakiin dibigaas wuxuu u badan yahay kan weynaaday oo kuwa yaryar looma dhowaado. Dibigaas baqayga noqday ama *boor*ba ha ahaadee oo weyn yaa la jebiyaa oo sankaa laga dalooshaa, markaasey raraan oo ku guuraan, waana la rartaa. Sida ay heeryada u qabsato awrka, uma qabsato oo waad aragtayoo saanta iyo hlibka lo'da waa kala soc-socdaan oo waa dheelli badan yahay. Dibiga dheelligiisa badan waxaa ugu wacan, xarigga maahee, waxaa weeye, haddii naag aan rari aqoon rarto saantaasaa guurguuraysa; hadday guurguurtana wixii kuu saarnaa waa kaa dheelliyayaan. Sida loo rartaana waa sidaas, soomaaliduse ma wada rarato, waxaana ugu badan gobolka Jubbada Hoose ilaa Afmadow, Kismaanyo iyo Badhaadhe. Baraawahaas laftigiisa wey soo gaadhaa. Arrimo badan oo ay soomaalidu ku kala duwan tahay ayaa jira oo qolaba si u sameysato. Anigu orgi la raranayo ma arag, dadbaase waxay yiraahdaan orgi bey rartaan.
Haddana waxaan u gudbinayaa Cabdi Dhegaweyne in uu noogu daro midabada iyo heesta loogu heeso.

Cabdi Dhegaweyne

Rarka dibida laga rarto Jubbada, aniga waa tegay, waana joogi jiray. Waxaa weeye, rag ra'yi leh yaa dibida rarkeeda soo rogay, waxayna u soo rogeen, meeshay joogeen baan joogay raggaasu odayaasha ah. Waxay ugu soo rogeen ari kuma dhaqmo meesha ay joogaan, geelna kuma dhaqmo. Marka haddayan lo'dii rarteen. Sida qaalibka ah oodna waa ku rartaan oo xagna lo'duu uga boodaa, waa laba nafoodlaha, sida awrka aan geela u haysan jirnay. Dibiguna awrka kama xoog yara oo aniga ninbaan la sheekaystay oo wuxuu ugu yiri: "Awr baa foolmaroodi ii qaadi waayey oo intaan saaray buu igala fariistay. Markaas baan dibi xoog leh oo *baqay* ah baan labadii foolmaroodi saaray". Anigaan intaan Kismaayo ka dhaqaaqay oo gaari ka raacay, meel la yiraahdo *bii*dhi, yaa gaarigii nagaga jabay, dhar culus iyo boorsana waa sitay, waa lugeeyay. Markaas ka hor, waa arki jiray dibi Kismaayo dhexdeeda lagu rarto oo gawaari lagu jiidaayo, laakiin kaa lagu guuraayo ma arag.

Markaas waxaan arkay dibi lagu guuraayo. Waxaa ugu soo horreysa gabar dibi baqay ah wadata. Iyadoo xarragoonaysa oo dibigu waa gurgursan yahay oo haanihii iyo biyihii iyo heeryadii intay saartay, sankuu ka daloolaa oo xariggay haysataa, iyana saasay u laafyoonaysaa, dibiguna sidaasuu caasha leeyahoo, qurux waan daawaday oo awrkiiba waa ka qurux yahay. Horta markaasaan ku dhegay oo naf baan nahay oo lix caana-maal baanu qatin nahayoo, markaasey i canaanatayoo. Kuwii ila socday qaarna dameeray ku dhegeen, qaar dibidii kaluu ku dhegay, aniga gabadha iyo dibigaa aan isha ku dhuftaan ku dhegay. Lix nin baanu markaa nahay. Haddaan isku qayqaylinayno naagihiina nagu yabqayaan oo sii dayn mayno waa xoogeynaa oo naf baa na haysa; yaa oday isna dibi wataa ayaa xagga dambe ka soo baxay. Odaygii baa naagihii nagaga qayliyey oo yiri naa sii daaya. Markaas buu odaygii noo yimid oo na yiri: “bal fariista”. Markaasuu caanihii lo'da oo soo ruxmay yuu laba noo soo jebiyey. Markuu ishayada arkay buu yiri caanaha biyo isaga dara oo iska barxa. Waa ka dheregnay caanihii oo ku noqnoqonay. Horta dibidu rarkeeda aniga meesha laga rarto saasaan u tegay, waa dhaaminayaan, waa rarayaan, waxayna ku keeneen meeshoodu ma laha awr oo geel ku dhaqmi maayo, arina ku dhaqmi maayo. Marka dibida haddayan raran, odayaashii baa yiri: “bal inoo rara dibideena”. Dibidu xoog waa leeyihiin. Xamar, Jowhar iyo nawaaxigooda, lo'du waa ku caano badan tahay. Laakiin dhulkaa aan tegay ee Waamo, lo'da lacag waa ku leedahay, nafaca dibidii la raraayey iyo cadna waa ku leedahay; caanase dhulkaa waqooyigaa kag badan oo caano ma laha lo'doodu. Toban sac oo dhulkaa Waamo ah waxaa ka caano badan laba sac oo waqooyigaa ah. Waxaad arkaysaa boqol sacoo dhashayoo reerkiiba kaga dhergayn Waamo. Mudug lo'du waa ku caano badan tahay. Dhulka Bakool iyo Bay waa ku caano badan tahay, wixii ka sarreeya oo carradaas ahna waa ku caano badan tahay. Lo'da Waamo waxay leedahay cad iyo lacag, waana ka waaweyn tahay kuwa kale. Marka la miisaamo neefka Waamo wuxuu la miisaan yahay laba neef oo waqooyi ah. Cadkeedana saasuu uga badan yahay, laakiin caano laga badan. Lo'deeda waa ka jilicsan tahay lo'da kale oo jiilaaka u adkaysan mayso oo roobkiiba intuusan bil maqnayn baad arkaysaa wixiiyoo wada tubanoo caato u dhintay, waana degaankoo, waa dalka. Dalka hawadiisa iyo daaqiisa suu nuxur u leeyahay iyo faytamiin u kala wanaagsan weeye. Horta midiba waa dalkay ku dhaqan tahay, midiba meel bay ku wanaagsan tahay. Kan *senga*ha iyo *dhufaan*ka iyo wixii aad na weydiisay, dibiga dhufaanka ah yaraantaa lagu dhufaanaa oo *senge* waa la yiraahdaa oo waxaa la yiraahdaa xaggaa Jubbada, annaguse *joome* ayaanu niraahdaa kan dhufaanka ah. Kan kalana *qoob* baa la yiraahdaa oo xooluhuu la mid yahay. Lo'du uma dhimato dhufaanka, geela, ariga iyo wananka waa la arkaa inay u dhintaan. Tan kale midabka isku midab ma aha, gobolba waa mid. Waamo aan tegay Lo'-caddeey iyo lo'-guduudba waa leedahay. Lo'-caddeydan sac madow bay yeelanaysaa, waxay yeelanaysaa midab barabara leh, waxay yeelanaysaa midib guduudan oo dhiin ah, waxay yeelanaysaa midab waraasa ah oo isna cayn gooni ah oo caddaan BIIFna aan ahayn.

Lo'da waqooyiga iyo Mudug aan ku aragno lo' yaryar weeye, aad bey u

caano badan tahay, aad beyna u adkaysi badan tahay, waana geeso yaryar tahay. Dibiga Waamo waa ka qiimo yar tahay dibigeeda, saa maba la ekaan karo. Horta midabada qaar waa waraasahaas, qaar waa dhiin, qaar waa xay-cad baa la yiraahdaa oo waa saca cad oo caddaanka caadiga ah, qaar waxaa la yiraahdaa *boor* waa qaar lo'datan boodhka ahoo waa indha giiran tahay oo dadkaasu *abay* bey yiraahdaan oo sanka waa cad yahay. Boodhkaasu dhiinkana waa raacaa oo mid dhiin ah oo isna la mid ah oo abayga raacsan baa jira. *dhaay* suulal madow baa jira oo jilbaha iyo suulasha ka madow oo boor bey yiraahdaan. Madow baa soo raaca. Madowga wuxuu u kala baxaa: *madow* tuke ah iyo *madow* magool ah oo cawliin ku jira oo beyda ku dhowoo soo raaca oo candhaduu cad yahay. Waa lo' madmadow oo dhuxusha tukaha ahba. Jubbooyinka madowgaasey *darmad* yiraahdaan.

Fiqi Buraale

Waad mahadsan tahay Dhegaweyne waana kugu malaynayey. Horta sidaas uu u sheegay Dhegaweyne waa ku wada raacsanahay anigu. Iyadoo sidaas ay tahayna waxaa la yiri: "Hadal nin badiyana ma wada oran, nin yareyana kama wada tegin".

Marka bal Salaad oo halkan koolkoolanaya laba xaaladood beynu weydiineynaa intaas uu Dhagaweyne yiri hadduu wax ku dari karo ha ku daro oo uu xusuusan yahay haddii kalena intiisa haku raaco, hase ahaatee laba qeybood oo inoo dhiman baan wax ka weydiin doonaa Salaad haddii Eebbe yiraahdo, labadaas inoo dimanna waxa weeye, mid waxa weeye caanaha lo’du qeybaha ay u kala baxaan ee loo manaafacaadsado qeybina waxa weeye lo’da midabadeeda intuu inoogu dari lahaa labadaas qeybood.